

Socotoo qundhacadii
Fadadkii mugdiga siday
Shucaaciisa ceshoo
Waa saacad iyo laba
Intaan saadinaayee
Naf sidkani ma samirtaa?
Ma sugtaa sedkeed maqan?

Ma yaqaano suuraha
Beentiyo sasabadee
Ma anigaan waqtiga sugin?
Mise waayaha sida?
Kaan sugayey yaw baxay?

Seddexdiyo shan iyo toban
Dayaxii ma soo baxay
Naftan sooftay ee maqan
Anoo sabada yuurura
Kaahisu ma i siray!
Ballantii ma siidayn
Seef wacadki kuma jarin
Ma i loobin samihii
Saaka aanu dhigane
Gaadiid socdaan jirin

Hubaayoo ma seexane
Basaskiyo sitayduu
Salka meel uu dhigo iyo
Sarajoogsi ku la yahay
Waa saboolka caadadi
Gefkaan uu sameeyee
Ma samraa sidii roob
I rabahu ma seegee
Murugadan i saaqdiyo
Laabta aan ka sara kacay
Yaa u sababa boholyada?
Maxaa laxaw i saanyaday

Haddii aan kalgacal solin
Laxaw saabtay mayracan
Maa kuwaa tagsigu sido
Uga soo degaan qaar

Sabuulka iyo beeraha
Sunta caashaq bixisiyo
Sadarda jacaylka leh
Ee laabta ugu siman
Haddii uu mid sidan laa
Aragtida uu suura ah
Sidaa uma ay dhaafeen....

C/Qaadir Xirsi Yanyam 1976